



Khayraadka Lagu Caawinayo Ardayda Inay Ka Gudbaan Natijadii Xumayd ee Ka Dhalatay Doorashada iyo Xil-U-Dhaarinta

Janaayo 15, 2021

Qoysaska PPS ee Sharafta Leh,

Waxa aanu aad ugu mahadnaqaynaa macallimiintayada iyo bulshadayada kuwaas oo waday in ay taageeraan ardaydayada wakhtiyadan kala guurka ee sanadkan. Doorashadii madaxweynaha iyo natijadii xumayd ee ka dhalatay, gaar ahaan weerarkii Janaayo 6 ee Dhismaha Baarlamaanka Maraykanka, waxa ay ahayd mid walaac iyo deganaansho la'aan nagu haysa dhammaanteen, dareenka xasillooni la'aantuna waa uu sii socdaa maadaama oo ay soo dhawaanayso xil-u-dhaarinta Joe Biden ee toddobaadka soo socda. Waa aannu ognahay in ay noqon karto wakhti gaar ahaan ugu adag ardaydeenna waxana aannu ahaanaynaa kuwo dhanka wanaagsan ka eega awoodda dimuqraadiyadda iyo waxbarashada inta ay isku dayayaan inay fahmaan dhacdooyinka iyo arrimaha.

Si aanu uga caawinno qoysaska inay ka taageeraan ardaydooda ka gudbitaanka caqabadahan, waxa aanu ururinay koox khayraad ah oo diiradda saaraysa doorashada iyo natijadii xumayd ee ka dhalatay. Waxa laga heli karaa boggan websaydka:

www.pps.net/civicengagement

Kolomka bidix ee bogga, waxa aad ka heli doontaa khayraad loogu talo galay ardayda iyo qoysaska, oo ay la socdaan turjumaadaha dhammaan shantayada luuqadood ee aannu taageerno. Sidoo kale waxa aad ka heli doontaa "Agabka Ku Lug Lahaanshaha iyo Deganaansho La'aanta Magaaleed" oo dhamaystiran. Iyada oo ay jirto in uu yahay khayraad loogu talagalay shaqaalaha PPS, PDF-kan waxa uu ka kooban yahay macluumaad qiime u lahaan kara xubnaha qoysaska iyo bulshada, sidoo kale.

Deganaansho la'aanta bulsheed iyo siyaasadeed ee waddankeenu arkay waxa ay keentay kacdoon rabshad leh oo ugu dambeyna guuldarreystay oo ka dhacay Xarunta Baarlamaanka Maraykanka. Waxa aanu ognahay in ardaydeenna iyo bulshadeenu ay marayaan raadadkii naxdinta lahaa ee dhacdooyinkan iyo in kuwani ay sii xumaanayaan inta lagu gudo jiro safmarka. Waxa aanu doonaynaa inaad ogaato inaanu halkan u joogno in midkeenba midka kale uu taageero.

Waxa aanu kugu dhiirrigelinaynaa inaad adeegsato dhammaan khayraadka aanu hayno ee diyaarka u ah inay ku caawiyaan, oo ay ku jiraan la hadalka macallimiinta ardaygaaga iyo shaqaalaha dugsiiga. Fadlan ogow in mudnaantayada ugu sarreysaa ay tahay badqabka ardaygaaga.

Mahadsanid, oo fadlan ammaan ahaw.